Wasaaradda Caafimaadka | Wasaaradda Waxbarashada

Ontario

# Qalabka baaritaanka COVID-19 ee loogu talagalay ardayda iyo caruurta ku jira dugsiga iyo goobta xanaanada caruurta

Nuqulka 3aad: Oktobar 18, 2021

**Ardayda iyo caruurta waa in laga baaraa cudurka COVID-19 maalin kasta ka hor inta aysan aadin iskuulka ama xarunta xanaanada carruurta. Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa midkaan buuxin kara iyaga oo ka wakiil ah ilmaha.**

Taariikhda (bb-mm-ssss) _____

## Su'aalaha baaritaanka

1. **Ardayga/cunugga hadda miyuu dareemayaa wax ka mid ah astaamahan cudurka?**
   Xanuunada halkaan ku taxani waa xanuunada inta ugu badan la xiriira COVID-19. Haddii aad leedahay astaamahan, waa in aad is-karantiishaa oo aad raadsataa baaritaan. Fadlan ogow baaritaanka degdegga ah ee lid-jidh dhaliyaha in aan loo adeegsan doonin kuwa leh astaamaha COVID-19 ama xiriirrada kiisaska COVID-19 ee la ogyahay.

   Qof kasta oo xannuunsan ama leh wax astaamo xannuun ah, oo ay ku jiraan kuwa aan hoos lagu qorin, waa in ay guriga joogaan oo ayna qiimeyn ka raadsadaan bixiyaha adeegga daryeelkooda caafimaad haddii loo baahdo.

   Ka dooro mid uun/dhammaan kuwa cusub, astaamaha ka sii daraaya, oo aanan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee ay horey u qabeen.

| | | |
|---|---|---|
| **Qandho iyo/ama qarqaryooyin**<br>Heerkul gaaraya 37.8 digrii Selsiyas/100 digrii Feeranhayt ama ka sii sareeya iyo/ama qarqaryooyin | ☐ Haa | ☐ Maya |
| **Qufac ama Qufac xiiq leh (hiraag)**<br>Joogto ah, ka badan sida caadiga ah, samaynaya cod foorin ah marka uu neefsanayo (oon laxiriirin cudurka neefta, boog horaysay ee dhuun mareenada, ama sababo kale oo la garanayo ama xaalado kale oo ay horay u qabeen) | ☐ Haa | ☐ Maya |
| **Neef ciriiri**<br>Neef sii dayn, awoodid la'aan hoos u neefsi (oo aan laxiriirin cudurka neefta, ama sababo kale ama xaalado kale oo ay horay u qabeen) | ☐ Haa | ☐ Maya |
| **Dhadhanka ama urta oo ka yaraatada ama ka go'da**<br>Aan la xiriirin xasaasiyad xiliyeedka, dhibaatooyin neerfaha, ama sababo kale ama xaalado kale oo ay horay u qabeen | ☐ Haa | ☐ Maya |
| **Lalabo, matagid iyo/ama shuban**<br>Aan la xiriirin cudurada calool xanuunka, walwalka, dhiigga caadada oo qabatiin leh, ama sababo kale oo la yaqaan ama xaalado kale oo ahy horay u qabeen | ☐ Haa | ☐ Maya |

2. **Kuwa soo socda miyay khuseeyaan ardayga/cunuga?**
   - Waxaa si buuxda looga tallaallay COVID-19 (waxaa laga joogaa muddo 14 maalmood ah ama ka badan tan iyo markii ay qaateen kuuradoodii ugu dambeysay ee tallaalka midkood ah taxanaha tallaalka labada-kuuro ama halka-kuuro)
   - Waxaa laga helay cudurka COVID-19 90-kii maalmood ee ugu dambeeyay (tan iyo markaasina waa laga waayay)

   Hadii jawaabtu HAA tahay, ka gudub su'aalaha 3, 4, 5

   Macluumaadka caafimaadka shakhsiyeed lama ururiyo marka aad buuxinayso qalabkan baaritaanka. Ujeeddada su'aashan laga leeyahay waa in la bixiyo tilmaamo is-karantiil sax ah, kuwaas oo lagu salleeyo xaaladda tallaalka iyo taariikhda hore ee caabuqa.

3. **Ma jiraa qof ardaygu/cunuggu uu la nool yahay oo hadda dareemaya wax ka mid ah astaamaha cudurka COVID-19 oo cusub iyo/ama sugaya natiijooyinka baaritaanka ka-dib marka uu dareemay astaamaha?** ☐ Haa ☐ Maya

   **Carruurta (<18 sano jirka):** qandho iyo/ama qarqaryo, qufac ama qufac dhawaaq la socda, neefashada oo dhib kugu noqota, yaraanshaha ama luminta dhadhanka ama urta, lallabo, matag iyo/ama shuban

   **Dadka waaweyn: (≥ 18 sano jirka):** qandho iyo/ama qarqaryo, qufac ama qufac dhawaaq la socda, neefashada oo dhib kugu noqota, yaraanshaha ama luminta dhadhanka ama urta, daal, muruq xannuun

   Haddii shakhsigu dareemaya astaamaha cudurka uu qaatay tallaalka COVID-19 48 kii saacadood ee la soo dhaafay oo uuna dareemayo keliya daal yar, murqo xanuun, iyo/ama isgoysyo xanuun oo keliya ku bilowday tallaalka ka-dib, dooro “Maya.”

4. **10 kii maalmood ee la soo dhaafay, ardayga/cunugga ma lagu ogaaday inuu “xiriir dhow” la yeeshay qof hadda qaba cudurka COVID-19?** ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii ay laanta Caafimaadka Dadweynuhu kugula taliyeen in aadan u baahnayn in aad is-keliyeyso, dooro "Maya."

5. **10 kii maalmood ee la soo dhaafay, ardayga/cunugga ma ku helay telefoonkiisa gacanta ogeysiiska Digniinta COVID in uu wajahay?** ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii ardayga/cunuga uu ilaa markaas laga waayey iyada oo la isticmaalayo baaritaan shaybaarka PCR, dooro "Maya".

6. **Mid ka mid ah kuwan soo socda miyaa lagu dabakhi karaa?** ☐ Haa ☐ Maya
   - **14-kii maalmood ee la soo dhaafay, ardayga/cunuga ma u safray dibedda ama meel ka baxsan Kanada miyaanna lagu yiri is-karantiil**
   - **14-kii maalmood ee la soo dhaafay, ardayga/cunuga ma u safray dibedda ama meel ka baxsan Kanada oo ma loo sheegay in aysan imaan iskuulka/daryeelka carruurta**

   Fadlan ogoow haddii ilmaha/ardayga aanan **si buuxda loo tallaallin** laakiinse laga dhaafay karantiilka dowlada federaalka sabab la xiriirta in safarka uu ku wehlinayay qof tallaallan, waa in aysan imaan iskuulka ama xarunta daryeelka carruurta muddo 14 maalmood ah. Dooro “haa” haddii ay tani khuseyso ardayga/ilmaha.

7. **Dhakhtarkaaga, daryeelka caafimaadka, ama unuga caafimaadka dadweynuhu miyay kuu sheegeen in ardayga/cunugga ay tahay in hadda la takooro (uuna joogaayo guriga)?** ☐ Haa ☐ Maya
   Midaan ayaa sabab u noqon karta dillaaca cudurka ama raadraaca la kulanka.

8. **10 kii maalmnood ee ugu dambaysay, ardayga/cunuga ma lagu sheegay in uu qabo iyada oo la isticmaalayo antijiinka degdegta ah ama is tijaabinta ku salaysan qaabka guri joogga?** ☐ Haa ☐ Maya
   Haddii ardayga/cunuga uu ilaa markii laga waayey iyada oo la isticmaalayo baaritaanka shaybaarka PCR, dooro "Maya".

## Natiijooyinka su’aalaha baaritaanka

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" mid uun ka mid ah astaamaha ku jira su'aasha 1 aad, ha aadin iskuul ama xanaano caruur.**

- Ardayga/cunugga waa in uu iskarantiilo (guriga joogo) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- La hadal dhakhtarka/caafimaad baxnaaniyaha si aad uga hesho talo ama qiimayn, ay ku jirto in ay u baahan yihiin in COVID-19 laga baaro.
  - Walaalaha ama dadka kale ee qoyska ka mid ihi ha joogeen guriga ilaa inta ardayga/cunuga ay ka muuqdaan calaamado muujinaaya in uusan qabin cudur, ama ay soo xaqiijiyeen laanta caafimaadka dadweynuhu, ama laga helay jiro kale. Xubnaha qoyska ee dhamays tirtay tallaalada ama horay looga helay COVID-19 muddadii ahayd 90 kii casho ee ugu dambaysay balse laga xaqiijiyay inaysan qabin cudurka loogama baahna in ay guriga joogaan.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan.

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" su'aalaha 3 aad, ha aadin iskuul ama xanaano caruur.**

- Ardayga/cunugga waa in uu iskarantiilo (guriga joogo) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- Ardaygu/cunugu wuu ku noqon karaa dugsiga ama xanaanada caruurta kadib markii qofka xanuunka qabay baaritaan looga waayo, ay ka nadiifiyaan unuga caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ihi, ama lagu sheegay jiro kale.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan.

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" mid su'aalaha 4 aad, ha aadin iskuul ama xanaano caruur.**

- Ardaygu/cunugu waa in uu is takooraa (guriga joogaa) 10 casho uusana ka tagin, marka laga reebo in uu ubaxayo in la soo baaro ama xaalad caafimaad oo degdeg ah.
- Raac talada qaybta caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaad, oo ay ku jiraan astaamaha ay tahay in la kormeero iyo goorta la qaadanayo baaritaanka PCR ee COVID-19. Fadlan ogow baaritaanka degdegga ah ee lid-jidh dhaliyaha in aanan loo adeegsan xiriirrada kiisaska COVID-19 ee la ogyahay.
- Ardaygu/cunugu waxa keliya ee uu ku noqon karaa dugsiga ama xanaanada caruurta 10 casho kadib, xataa haddii ay helaan natiijo muujinaysa inuu qabo xanuunka, ilaa intii ay ka gaarayaan heer aysan wax xanuuno ah isku arag.
  - Walaalaha ama dadka kale ee qoyska ka mid ihi way aadi karaan dugsiyada, xanaanada caruurta ama shaqo, laakiin waa in aysan guriga uga bixin sababo kale oo aan asaasi ahayn. Xubnaha qoyska ee dhamays tirtay tallaalada ama horay looga helay COVID-19 muddadii ahayd 90 kii casho ee ugu dambaysay balse laga xaqiijiyay inaysan qabin cudurka loogama baahna in ay guriga joogaan.
- Haddii ardayga/cunuga uu isku arko wax ka mid ah astaamaha kor ku xusan ama cudurka laga helo, la xiriir unugga caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga ama dhakhtar/bixiyaha adeegga daryeelka caafimaad si aad uga hesho talo dheeraad ah.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan.

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" su'aalaha 5 aad, ha aadin iskuul ama xanaano caruur.**

- Ardayga/cunugga waa in uu iskarantiilo (guriga joogo) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- Booqo xarun qiimaynta si aad ugu hesho baaritaanka COVID-19.
  - Haddii cudurka laga waayo marka lagu sameeyo baaritaanka PCR (oo aysan fayrasku qabin), waxaa ay dib ugu soo noqon karaan iskuulka/daryeelka carruurta.
  - Haddii cudurka laga helo marka lagu sameeyo baaritaanka PCR (oo ay qabaan fayraska), waxay u baahan yihiin in ay sii wadaan is-karantiilka waxayna soo noqon karaan oo keliya markii uu soo fasaxo unuga caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga.
- Haddii ay astaamaha cudurku ku bilowdaan, la xiriir qaybta caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama dhakhtarkaaga/daryeel bixiyaha si aad uga hesho talo-bixin dheeraad ah.
  - Carruurta walaalaha ah ama dadka kale ee gurigaaga jooga waxay aadi karaan iskuulka, daryeelka carruurta ama shaqada, laakiinse waa in aysan guriga uga tagin, sababo kale oo aanan aasaasi ahayn ilaa iyo inta shakhsiga helay digniinta COVID ay natiijadiisa baaritaanka PCR ka noqonaysa cudurka waa laga waayay, ama uu soo fasaxo unuga caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga. Xubnaha qoyska ee dhamays tirtay tallaalada ama horay looga helay COVID-19 muddadii ahayd 90 kii casho ee ugu dambaysay balse laga xaqiijiyay inaysan qabin cudurka loogama baahna in ay guriga joogaan.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyaha ilmaha si uu u ogaado natiijadaan natiijadaan. La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan.

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" su'aalaha 6 aad, ha aadin iskuul ama xanaano caruur.**

- Ardaygu/cunugu waa in uu raacaa tilmaan hagaha federaalka ee loogu talagalay shakhsiyaadka u safray caalamka, oo ay ku jiraan ardayga/cunuga aan dugsi aadayn tan iyo 14 casho markay yimaadeen waana in la baaro sida ku xusan shuruudaha federaalka.
- Haddii ardaygu/cunugu yahay mid lagu amray is karaantiilid, waa inay joogaan guriga 14 casho aysana ka bixin marka laga reebo in ay u baxayaan baaritaan ama xaalad caafimaad oo deg-deg ah. Akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha federaalka ee ku taxaluqa musaafiriinta, fadlan ka eeg Webseedka Dawlada Kanada.
- Haddii ardayga/cunuga ku bilowdaan astaamaha cudurka iyo/ama lagu sheego xanuunka, la xiriir laanta caafimaadka dadweynaha ee xaafadaada maxalliga ah ama dhakhtar/daryeel bixiyaha si aad uga hesho akhbaar dheeri ah.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan.

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" su'aasha 7 aad, ha aadin iskuul amd xanaano caruur.**

- Ardayga/cunugga waa in uu iskarantiilo (guriga joogo) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- Raac talo-bixinta caafimaadka dadweynaha. Ardayga/cunugga ayaa dib ugu noqon kara iskuulka/daryeel bixiyaha ilmaha ka-dib marka ay fasaxdo qaybta caafimaadka dadweynaha.
- Haddii ardayga/cunuga ku bilowdaan astaamaha, la xiriir laanta caafimaadka dadweynaha ee xaafadaada maxalliga ah ama dhakhtar/daryeel bixiyaha si aad uga hesho talooyin dheeri ah.
  - Walaalaha ama dadka kale ee qoyskiinu waa in ay guriga joogaan ilaa ardayga/cunuga laga waayo xanuunka, ama laanta caafimaadka dadweynuhu siiyo xaqiijin ah inuusan cudurka qabin. Xubnaha qoyska ee dhamays tirtay tallaalada ama horay looga helay COVID-19 muddadii ahayd 90 kii casho ee ugu dambaysay balse laga xaqiijiyay inaysan qabin cudurka loogama baahna in ay guriga joogaan.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan.

**Haddii aad kaga jawaabtay "HAA" su'aasha 8 aad, ha aadin iskuul amd xanaano caruur.**

- Ardayga/cunugga waa in uu iskarantiilo (guriga joogo) oo waa in uusan bixin marka laga reebo in uu u baxo baaritaan ama xaalado caafimaad oo degdeg ah.
- Booqo xarun qiimaynta si aad ugu hesho baaritaanka COVID-19.
  - Haddii cudurka laga waayo marka lagu sameeyo baaritaanka PCR (oo aysan fayrasku qabin), waxaa ay dib ugu soo noqon karaan iskuulka/daryeelka carruurta.
  - Haddii cudurka laga helo marka lagu sameeyo baaritaanka PCR (oo ay qabaan fayraska), waxay u baahan yihiin in ay sii wadaan is-karantiilka waxayna soo noqon karaan oo keliya markii uu soo fasaxo unuga caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga.
- Haddii ay astaamaha cudurku ku bilowdaan, la xiriir qaybta caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama dhakhtarkaaga/daryeel bixiyaha si aad uga hesho talo-bixin dheeraad ah.
- Walaalaha ama dadka kale ee qoyskiinu waa in ay is takooraan ilaa qofka cudurka looga helay qaabka antijinka dhaqsaha ah ama baaritaan heer guri ah oo uu iskiis qalab isugu baaray oo iska waayey ama baaritaan PCR ama laanta caafimaadka dadweynuhu ay xaqiijiso inuusan qabin cudurka. Xubnaha qoyska ee loo dhameeyey tallaalka ama horay looga helay COVID-19 mudadii ahayd mudadii 90 kii casho ee ugu dambaysay balse laga xaqiijiyay inaysan qabin cudurka loogama baahna inay joogaan guriga.
- La xiriir iskuulkaaga/daryeel bixiyahaaga ilmaha si aad ugu sheegto natiijadaan

**Haddii aad kaga jawaabtay "MAYA" dhammaan su'aalaha, cunugaagu wuxuu aadi karaa iskuulka/xarunta daryeelka ilmaha. U raac ardaygaaga/cunugaaga nidaamka loo dejiyey caafimaad baxnaaniyaha adoo u sheegaya shaqaalaha si ay u ogaadaan natiijada.**

- Sida ku cad baratakoollada rasmiga ah, dhammaan shakhsiyaadka la jirran ama la xannuunsan wax ka mid ah astaamaha jirrada waa in uu guriga joogaa, oo uu qiimayn ka raadsadaa bixiyaha adeegooda daryeelka caafimaad ee caadiga ah haddii loo baahdo.
- Shakhsiyaadka qaba xanuuno khatar ah ee u baahda xanaano degdeg ah waa in ay aadaan waaxda caafimaadka degdegta ah ee ugu dhow.
- Haddii qof uu ku billoowdo xanuun ka baxsan taxanahaan sare ku xusan, Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku qalqaalin karta dadaallo kale oo ay ku jiraan baaritaano ku salaysan qiimaynta xanuunada qofka iyo xanuunada horey ugu dhacay.

## Caafimaadka Dadweynaha ee Ontario – Raadraaca Xiriirka

**Ka jawaabidda su'aalahan waa ikhtiyaari**. Macluumaadkaan waxaa keliya adeegsanaya saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha iyaga oo u adeegsanaya raacraaca xiriirka. Macluumaadka oo dhan waxaa lagu tirtiri doonnaa muddo 28 maalmood gudahooda ah.

Taariikhda: _____

Magaca: _____

Teleefoonka ama Email-ka: _____